



Crash Dynamics ***(Baaritaanka Shilka)***

Kursiga Baabuurka ee Saxda ah waa Muhiim

Crash dynamics (Baaritaanka Shilka) waa xoogga awoodda ee ka dhalato shil baabuur.

Kursiga Baabuurka wuxuu ka hortagaa dhaawaca. Kursiga Baabuurka wuxuu ka hortagga awoodda ka dhalato shilka baabuurka waxaa uuna saameynta ka harta si siman ugu fidiyaa guud ahaan jirka canuga.

Ka ilaali canugaaga adigoo adeegsanayaa kursiga baabuurka ee sida saxda ah loogu rakibay baabuurka kaas oo ku habboon da'da canuga, dhirirkiisa, iyo miisankiisa.



**Department
of Health**

Marxaladaha kala Duwan ee Shilka

Marxaladda 1-aad: Shilka Baabuurka

Waxaa uu dhaca marka baabuurka uu ku dhaco wax oo uu kala daato amaba qallooco marka uu wax ku dhaco.




Marxaladda 2-aad: Shilka Khuseeya Dadka

Waxaa uu dhaca marka uu baabuurka istaagaayo iyadoo jirka bani'aadanka uu ku sii socdo xawaarihii hore ee baabuurka.



Marxaladda 3-aad: Shilka Gudaha

Waxaa uu dhaca marka jirka uu gebi ahaanba istaago oo uu shaqayn waayo, balse xubnaha gudaha ay weli dhaqdhaqaaqaayan. Marxaladan waxay inta badan sababtaa dhaawac halis ah amaba qofka waxay uu horseedi kartaa geeri.



Noocyada Kuraasta Baabuurta



Kuraasta baabuurta ee ujeeda-dhinaca muraayadda waxay hoos uu dhigan halista dhaawacyada iyagoo kuu ilaalinayaa madaxa, qoorta, iyo laf dhabarta iyagoo xoogga shilka ku fidinayaa guud ahaan jirka.



Kuraasta baabuurta ee horay-ujeedawaxay xoogga shilka ku fidinaayan guud ahaan jirka canuga iyagoo ku celinayaa canuga kursiga baabuurka. Adeegsiga **xariga** waxay ka xadidaa madaxa canuga in uusan hor uu dhaqaaqin.



Kuraasta canuga kor uu soo qaadayo waxay kor uu soo qaadan canuga iyagoo gaarsiinayaa heerka uu canuga suunka boowdiyaha iyo garabka uu si wanaagsan ugu xiran karo miskaha iyo xabadka.



Suunka kursiga waxay rakaabka ku celinaayan kursiga baabuurka marka uu shil dhaco. Suunka kursiga waxaa lagu xirtaa miskaha iyo xabadka.

Inaad canugaaga geliso kursiga baabuurka ee sida fiican loo rakibay waxay sare uu qaada fursadaha in uu badbaado marka uu dhaco shil.

- Kuraasta baabuurka waxay hoos uu dhigan saamaynta shilka halka ay isla durbadiiba ka xakamayn lahayd dhaqdhaqaaqa canuga.
- Kuraasta baabuurka waxay xoogga Shilka ku fidiyaan qayb wayn oo jirka canuga ah iyagoo canuga ku celinayaa kursiga.
- Kuraasta baabuurka waxay madaxa canuga ku celiyaan si la siman jirkooda iyagoo ilaalinayaa qoortooda.

Kala ilaali in rakaabka uusan suunka uu xirnayn iyo alaabta iska dhex taalla baabuurka inay isku dhacan.

- Dhammaan rakaabka ku jira baabuurka waa in ay suunka xirtan.
- Adeegso kursiga baabuurka, kursiga canuga kor uu soo qaadayo, amaba suunka kursiga mar kaste oo aad safar galayso.
- Geli kuraasta hoostooda alaabta baabuurka iska dhex taallo, qaybta dambe ee baabuurka amaba qaybta hore ee kaydka baabuurta.
- Carruurta waa in la fadhisiya kursiga ugu dambeeya ilaa iyo inta ay ka gaaraayan da'da 13 sano jir.
- Hubi in aad adeegsanayso kursiga baabuurka ee ay uu dhan yahay shuruudaha badqabka ee Maraykanka.
- Raac tilmaamaha shirkadaha sameeyay kursiga baabuurka iyo bogga baabuurka si aad si sax ah uu rakibato kursiga baabuurka.
- Adeegso koodka QR si kursiga baabuurkaaga uu u hubiyo **Farsamo yaqaanka Shahaadada uu haysta Badqabka Canuga Rakaabka ah.**



health.ny.gov/carseats

trafficsafety.ny.gov

Waxaa shaqadani maalgeliyay Maamulka Qaran ee Badbaadada
Wadooyinka oo deeq ka helay Guddiga Guddoomiyaha Gobolka
New York ee Badqabka Wadooyinka.



Department
of Health